



Tilmaamaha Xirmooyinka Warqadda Codbixinta

Is diyaari

Waxaad u baahnaan doontaa:

- Warqaddaada codbixinta
- Qalin
- Sharooti fasiix ah
- Bakhshad

Xirmooyinka warqaddaada codbixinta beddelka ah waxaa ku jiri doona:

- Xaashida bayaanka iyo saxiixa
- Xaashida lifaaqa ee ikhtiyaarka ah
- Xaashida bakhshadda ee la jaran karo

1 Diyaari xirmooyinka warqaddaada codbixinta

1. Daabac xirmooyinka warqaddan codbixinta. Muhiim! Markaad warqaddaada codbixinta daabacayso, hubi inaad doorato dookha ah "fit to page" (ku habboon bogga) si dhammaan dhererka warqadda codbixinta loo daabaco.
2. Saxiix oo ku qor taariikhda xaashidaada Bayaanka iyo saxiixa.
3. Xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay isugu habee sida tallaabooyinka hoos lagu muujiyay ay isugu xigaan:
 - a. Xaashida bayaanka iyo saxiixa
 - b. Xaashida lifaaqa ee ikhtiyaarka ah
 - c. Warqaddaada codbixinta ee lagu codeeyay

Warqadda codbixinta

Xaashi lifaaq oo ikhtiyaar ah

Xaashida bayaanka iyo saxiixa

2 Soo celi warqaddaada codbixinta

Waxaa jira laba hab oo aad warqaddaada codbixinta ku soo celin karto.

Ikhtiyaarka 1: Sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta

Ku rid xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay bakhshad adigoo isticmaalaya Xaashida Bakhshadda ee La Jaran Karo sida lagu faray. Booqo [www.kingcounty.gov/elections](#) si aad u hesho sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta.

Ikhtiyaarka 2: Boostada

Ku rid xirmooyinka warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay bakhshad adigoo isticmaalaya Xaashida Bakhshadda ee La Jaran Karo sida lagu faray. Warqadaha codbixinta ee boostada lagu soo diro waa inay lahaadaan shaabadda boostada oo ah ugu dambeyn Abril 23, 2024.



Warqaddaada codbixinta waa inay lahaato shaabadda boostada ama la soo celiyo ugu dambeyn 8 p.m. (Wakhtiga Baasifiga) Abril 23, 2024.

Xaashida Bayaanka iyo Saxiixa

Tilmaamaha

Buuxi tallaabooyinka 1-3 ee hoose. Xaashidaan waa in la saxiixaa, taariikhdana lagu qoraa iyo waa in lala soo celiyaa warqaddaada codbixinta.

1 Akhri bayanka

Waxaan ku dhaaranayaa ama aan xaqiijinayaa, anigoo ogsoon in dhaar beeneedu ay ganaax tahay, in aan ahay:

- Muwaadin Mareykan ah;
- Degane ku nool gobolka Washington oona buuxiya shuruudaha codbixinta ee uu farayo sharciga gobolka;
- Ugu yaraan ah 18 sanno jir maalinta doorashada, ama ah 17 sanno jir xilliga ay dhacayso doorashada hordhaca iyo 18 sanno jir ah marka la gaaro maalinta doorashada guud ee dhacda bisha Nofeembar;
- Ka codbixinaya doorashadaan hal mar oo keliya, oo aan ka codeynin xukun kale oo ka tirsan dalka Mareykanka;
- In aanan laygu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn awgeed, iyo aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa;
- Laygama mamnuucin codbixinta amar maxkamad awgeed, iyo
- Waxaan ogsoonahay in saxiixa been-abuurku uu yahay sharci doro ama in qof kale loo codbixiyiyo iyo isku day codbixin iyadoo lagaa mamnuucay, isku day codbixin in ka badan hal mar, ama in si been-abuur ah loo saxiixo bayaankan waa dambi-weyn oo lagu mutaysan karo xukun xabsiga ugu badan oo ah ilaa iyo shan sanno, ganaaxa ugu badan oo gaaraya ilaa iyo \$10,000, ama labadaba.

2 Buuxi macluumaadkaaga codbixiyaha

Waa inaad bixisaa macluumaadkaaga codbixiyaha si warqaddaada codbixinta loo tiriyo. Goobaha oo dhan waa loo baahan yahay.

Magaca hore Dhexe Magaca dambe Taariikhda dhalashada (bisha/maalinta/sannadka)

Ciwaanka deganaanshaha Magaalada Zip-ka

Ciwaanka boostada Magaalada Zip-ka

Macluumaadka ku qoran foomkan looma isticmaali karo si aad u cusboonaysiiso macluumaadkaaga codbixiyaha. Fadlan booqo votewa.gov si aad wax uga beddesho diiwaan gelintaada.

3 Saxiix oo taariikhda ku qor

Waa inaad saxiixdaa oo aad taariikhda ku qortaa si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.

X / /

saxiixa codbixiyaha (loo baahan yahay) taariikhda (bisha/maalinta/sannadka)

iimeel ama taleefan lambar (*ikhiyaari, keliya haddii ay arrin ka jirto dhinaca saxiixaaga*)

Haddii aadan awoodin inaad saxiixaaga qorto, calaamad ku samee aagga saxiixa ee kore. Markaad calaamadnayso waa in laba qof oo markhaati ah ay goob joog yihiin oo iyagana saxiixa halka hoose. Ma isticmaali kartid awoodda qareenka si aad qof kale ugu saxiixdo.

saxiixa markhaatiga 1aad

saxiixa markhaatiga 2aad



Haddii aadan saxiixin oo aadan taariikhda ku qorin waxay burinnaysaa warqaddaada codbixinta.

ku sii soco Xaashida Lifaaqa ee Ikhiyaarka ah



Abril 23, 2024
Doorashada Gaarka
Degmada King, Washington



Waxaad boggan ku soo celin kartaa Doorashooyinka Degmada King, laakiin looma baahna.

Xaashida Lifaqa ee Ikhtiyaarka ah

Waa maxay kan?

Xaashidaan waa ikhtiyaari oo waxay warqaddaada codbixinta ka dhigaysaa mid qarsoodi ah marka xirmooyinka warqaddaada codbixinta ay soo gaarto halka Doorashooyinka Degmada King. Fadlan ogow warqadaha codbixinta ee la daabaco iyadoo la isticmaalaayo habka oonleenka ayaa laga yaabaa inay qarsoodi yar yihiin marka shaqaalaha Doorashooyinka ay habeynayaan.

Tilmaamaha

Markaad dhammayso ku codeynta warqaddaada codbixinta oo aad saxiixdo bayaanka, waxaad diyaar u tahay inaad u dhaqaaqdo xagga tallaabada xigta.
Ku noqo xagga Tilmaamaha Xirmooyinka Warqadda Codbixinta, tallaabada 2.

ku noqo xagga Tilmaamaha Xirmooyinka Warqadda Codbixinta



i Yaa deeq ku bixiya ololeyasha?
Eeg ku-deeqyeasha musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga
Guddiga Kashifaadda Dadweynaha
www.pdc.wa.gov
Toll Free 1-877-601-2828



Macluumaadka Xiriirka

taleefan: 206-296-VOTE (8683)

1-800-325-6165

TTY Relay: 711

iimeel: elections@kingcounty.gov

oonleen: kingcounty.gov/elections

Abril 23, 2024
Doorashada Gaarka
Degmada King, Washington

Xaashida Bakhshadda ee La Jaran Karo

Waa maxay
kan?

Isticmaalka sawirkha hoose waxay xirmooyinka warqaddaada codbixinta u aqoonsanaysaa warqaddaada boostada ee doorashada rasmiga ah. Muhiim! Haddii aad agabka warqaddaada codbixinta ku soo celinayso boostada sawirkha bakhshadda ee hoose ayaa ku siinaya boosto bilaash ah oo lacageeda hore loo bixiyay iyo dirid heerka koowaad.

Tilmaamaha

- Ka jar sawirkha bakhshadda ee hoose halka ay ku taallo xariiqaha dhilib dhibicda ah.
- Sawirkha ku dheji bakhshad. Ka taxaddar inaad sharooto ku daboosho aagga shaabadda boostada ee halka geeska kore ee midigta bakhshaddaada.
- Isku laab xirmooyinka warqadda codbixinta ee aad buuxisay (xaashida bayaan ka iyo saxiixa, xaashida lifaaqa warqadda codbixinta ee ikhiyaarka ah, iyo warqadda codbixinta) oo ku dhex rid bakhshadda.
- Isku xir bakhshadda oo boostada ku dir.



Waa inaad xaashida
xirmooyinka warqaddaada
codbixinta ku soo celiso
Doorashoooyinka Degmada King.

Isticmaalka sawirkha hoose waxay xirmooyinka warqaddaada codbixinta u aqoonsanaysaa warqaddaada boostada ee doorashada rasmiga ah. Muhiim! Haddii aad agabka warqaddaada codbixinta ku soo celinayso boostada sawirkha bakhshadda ee hoose ayaa ku siinaya boosto bilaash ah oo lacageeda hore loo bixiyay iyo dirid heerka koowaad.

- Ka jar sawirkha bakhshadda ee hoose halka ay ku taallo xariiqaha dhilib dhibicda ah.
- Sawirkha ku dheji bakhshad. Ka taxaddar inaad sharooto ku daboosho aagga shaabadda boostada ee halka geeska kore ee midigta bakhshaddaada.
- Isku laab xirmooyinka warqadda codbixinta ee aad buuxisay (xaashida bayaan ka iyo saxiixa, xaashida lifaaqa warqadda codbixinta ee ikhiyaarka ah, iyo warqadda codbixinta) oo ku dhex rid bakhshadda.
- Isku xir bakhshadda oo boostada ku dir.

REPLY MAIL

POSTAGE WILL BE PAID BY ADDRESSEE

NO POSTAGE
NECESSARY
IF MAILED
IN THE
UNITED STATES



BUSINESS REPLY MAIL

FIRST-CLASS MAIL PERMIT NO. 5 RENTON WA

codeyn!

KING COUNTY ELECTIONS
919 SW GRADY WAY STE 200
RENTON WA 98057-9815